
# UNPOS Quarterly

Qoormada 5 aad
November 2012

*Horumarinta Nabadda iyo Dibuheshiisiiinta Soomaaliya*



# SOMALIA
## KUMEEL GAAR LAGU GAAREY ISBEDDEL





# Warqad furan oo ku socota Xildhibaanada Baarlamanka Soomaaliyeed



Moqadisho, 6da September, 2012

Walaalayaal, Marwooyin iyo Mudanayaal, Asalaamu Caleykum. Waxaan warqaddan idiinku soo qorayaa iyadoo ay noo soo dhowdahay maalin dhab ahaantii aad muhiim ugu ah dhammaan dadka soomaaliyeed. Ka dib muddo labaatan sano ah oo lagu jiray dagaal sokeeye, burbur dowladeed iyo niyad jab aan la soo koobi karin oo ku dhacay dadka Soomaaliyeed ee sharafta leh, waxaan maanta ku jirnaa saacadihii ugu dambeeyey markii la qaban lahaa doorashada Madaxweyne cusub – arrintaasoo ah dhacdadii gebi ahaanba soo afjaraysa xilliga ku-meelgaarka ah waxaana loo gudbayaa marxalad ah isbedel siyaasadeed iyo mid bulsho-dhaqaale.

Ma dhib yareyn sidii heerkan aynu ku soo gaarnay. Dhibkii badnaa ee dhammaantiin aad soo wada marten sannadihii dhibaatada badnaa ee la soo dhaafay waxaa idiin dheeraa in geeddi-socodka siyaasadda iyo xaaladda amniguba ayn ahayn mid sahlan. Waxaa jirtay in marar ay rajadu u muuqatay mid luntay oo mararka qaar aynu qarka u saarneyn masiibo. Hase ahaatee, geesinimada, kuadkeysiga iyo go'aanka dadka Soomaaliyeed ayaa waxay ka adkaadeen caqabadahan adadag waxay ina soo gaarsiiyeen halka aynu maanta joogno: Laga soo billaabo ur律rintii Odeyaasha Dhaqanka, Golihii Ansaxinta Dastuurka, Xulitaankii Baarlamaanka iyo doorashadii Guddoomiyaha Baarlamaanka, hanaanku wuxuu ahaa mid loo wada dhanyahay, hufan oo laga wada qaybgalay. Habkan la raacay ayaa sidoo kale qayb ka qaatay badbaadinta xaaladda. Guud ahaan, geeddi-socodka iyo natiijada ka dhalatayba waxaa ammaanay inta badan dadka Soomaaliyeed gudaha dalka iyo dibaddaba iyo weliba bulshada caalamka oo idil.

Yoolka la higsanayo waxaa la gaarsiiyay meel aad u sareysa. Tani waa inay sii socotaa, maadaama, indinkoo ah xildhibaanadii Baarlamaanka ugu aqoonta sareeyay taariikhda Soomaaliya, aad diyaar u tihiin inaad doorataan Madaxweyne soo dhisa xukuumad cusub oo aan ku kalsoonahay inay ka soo bixi doonto shuruudihii aad horeba u dejiseen. Labadan toddobaad, waxaad durbaba muujiseen hogaan wanaagsan iyo hanashada geeddi-socodka idinkoo ka wakiil ah dadka Soomaaliyeed. Dhammaan dadka Soomaaliyeed, Waddamada Gobolka iyo bulshada caalamka inteeda kaleba waxay rajo iyo u hanqaltaagid ku eegayaan kuna dhowrayaan maalmahan yar ee haray. Waa inaan ka soo baxnaa rajadan iyo filashadan oo aan dooranaa Madaxweyne na siin doona xukuumad wanaagsan oo la aamini karo oo idiin noqonaysa hogaan wadajir ah ee Baarlamaankan cusub.

Walaalayaal, Marwooyin iyo Mudaneyaal, hadda arrintu idinka ayay idiin taallaa. Idinkaa ah awoodda gobanimada ugu sareysa dalka. Mustaqbalka dalka hadda gacantiinuu ku jiraa. Maalmaha soo socda waxaa idin la hadli doona dhammaan musharaxiinta oo si fagaara ah u soo jeedin doona aragtidooda. Dhegeysta oo ka dhex xusha (go'aan ka gaara).

Waxaynu dhammaan wada maqalnay warar ku-tiri-kuteen ah oo la isla dhexmaraya oo ku saabsan musuqmaasuq iyo isku day laaluush. Warbaahinta waaxa ka buuxa eedeymo ah in inaga dhammaanteena oo hawshan wadna aynu qaadanay lacago ama naasnuujinno kale si loogu codeeyo musharax gaar ah ama la isku dayo in doorashada dhinac loo weeciyo. Run ha ahaato ama been ha ahaato, runtu maalin bay soo bixi doontaa, laakiin hadda aan sii socono. Codeynta aad ka wada qayb qaadan doontaan waa mid qarsoodi ah gebi ahaanba. Ma jiro qof aan ahayn adiga iyo Eebbaha Ilaahay ah, ee ku eegaya, oo og magaca aad ku ridayso sanduuqa codeynta. Weligaa laguma ogaanayo waxaadna leedahay xasaanad oo lagaama aargoosan karo. Waxaan idinku goobaabinayaa inaad ka fikirtaan waxa dalkiina u fiican oo codkiina ku bixisaan damiirkiina oo saafi ah. Waa inaadan ka fikirin inaan ku qasban tihiin waajib gaar ah oo aan ahayn danaha dalkiina iyo dadka Soomaaliyeed. Doorta musharaxa noqon doona mid daacad ah oo waxtarna u ah inuu dalka ku hogaamiyo aragti ku haboon afarta sanno ee soo socota oo ah isbedel iyo nabad ka dhalata Soomaaliya. Sharaftiina iyo fursadiinaba waxay ku jiraan codka qarsoodiga ah, ee marnaba fursadani yayna idinka siiban 10ka bisha September 2012. ■

***Dr. Augustine P. Mahiga***
***Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha***
***Guud ee Qaramada Midoobay***

# Tusmada Qormadan


2 *Farriinta Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee ku socota Xildhibaanada Soomaaliyeed*

4 *Geeddi-socod siyaasadeed oo taariikhi ah*

5 *Dastuur loo bogay*

6 *Qorshaha amniga Soomaaliyeed*

7 *Taariikh nololeedka Xaliima Ibraahim – La-Gudoomiyaha Guddiga Farsamada Xulitaanka*

8 *Garyaqaanada: Danjireyaasha cusub ee xuquuqul insaanka Soomaaliya*

9 *Wuxuu kayimid Twitterka-wuxuuna ku socda Goobaha Shaaha lagu cabo*

10 *Haweenku waxay ku xisaabtamayaan nabadda*

11 *Shaqaalaha gargaarka baniaadanimada ayaa isbedel ka sameeya Soomaaliya, inkastoo ay jiraan caqabado*

12 *Ciiidamada AMISOM ayaa qabsaday goobo cusub*

14 *Sawirrada Baarlamaanka Soomaaliyeed*


UNPOS twitter @UNPOSomalia

UNPOS tumbler unposomalia.tumblr.com

UNPOS flickr flickr.com/photos/unpos

UNPOS


Contact:
Public Information Office, United Nations Political Office for Somalia
Email: unpos_pio@un.org



Madaxweynaha cusub ee Soomaaliya Hassan Sheikh oo xilka la wareegaya kadib xafladii caleema saarka, kooxdiisa abaabulaya isla markaana ku hawlan arrimaha ay dowladu muhimadda siineyso

# Geeddi-socod Siyaasadeed oo Taariikhi ah

*Fexton Matupa, Hawlwadeenka Arrimaha Siyaasadda, Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan siyaasadda Soomaaliya (UNPOS).*

Waxay ahayd arrin taariikho ah in la arko Xildhibaanada Baarlamaanka Soomaaliyeed oo Madaxweyne doora-naya markii ugu horaysay in ka badan muddo labaatan sanno. Arrintan waxay ahayd arrin muhim ah waayo waa markii ugu horaysay ee muddo labaatan sanno gudaheed ah oo madax-weyne lagu doorto gudaha soomaaliya.

Hawshu, ama habka doorashadu, waxay u dhacday si xor ah oo xaq ah waxaana loo arkay inay ahayd guul u soo hoyatay dadkii doonayay in isbedel ka dhaco dalka. Sida masuuliyadda qaran leh ee uu u ogolaaday madaxweynihii laga guulaystay Sheekh Shariif Sheekh Axmed, uuna aqbalay ka guulaysiga ayaa iyaduna waxay ahayd tallaabo wax ku ool ah oo Soomaaliya ka dhacday, arrintaas oo horseeday in si nabad ah hogaanka dalka isu badelo. Caleemasaarkii Madaxweynaha cusub 16kii September, 2012 ayaa iyaduna sii adkeysay isbedelka nabadda ah ee hogaanka isu bedelay. Tani waa cashar aan rajaynayno in dhammaan dadka laga guulaysto mustaqbalka ay raaci doonaan, taasoo ah in danta qaranka laga hormariyo rabitaanka qiimaha aan lahayn, si sharaf lehna uu qofku u ogolaado in laga guulaystay. Dhammaan ar-rimaha aan soo sheegnay ayaa siiyay dadka soomaaliyeed rajo cusub, taasoo ay la'aayeen muddo labaatan sanno ka badan.

Markii saxiixayaasha Soomaaliyeed ee qorshe-hawleedka (Roadmap) ay ku kulmeen Nairobi 22kii June, 2012, waxay dhaqaajiyeen geedisocod siyaasadeed ee Soomaali leedahay oo lagu dhammeynayay xiliga ku meelgaarka ah, waxayna ku heshiiyeen heshiisyo borotakool ah oo lagu dhammeynayo ku-meelgaarka waxayna isla ogolaadeen Qabyo-qoraalka Dastuurka Ku-meelgaarka ee dib loogu noqday.

Arrintaasi waxay dedejisay inay dhacaan arrimo dhowr ah oo taxane ah oo ugu dambayntiina ku soo gabagaboobay in 10kii September, 2012, Xasan Sheekh Maxamuud loo doortay Madax-weynaha Dawladda Federaalka Soomaaliyeed. Doorashadani ma ahayn keliya mid lagu dhammaysay marxaladdii ku meel-gaarka ahayd ee siddeed sanno dalka ka jirtay, laakiin waxay ahayd arrin bog cusub u furtay Soomaaliya.

Natiijada ka soo baxday dhammayntii qorshe-hawleedka ayaa sababtay in la dhiso saddex hay'adood oo noqday kuwo muhiim u ah dhammaynta ku meelgaarka: 135ka oday dhaqameed; oo iyagana soo xulay 825 ergo oo ah Golahan Ansaxinta Dastuurka (NCA); oo 1dii Agoosto ansixiyay dastuurka ku meelgaarka ah.

Oday dhaqameedyadu waxay soo magacaabeen 275 xubnood oo ka midnoqday Baarlamaanka Federaalka cusub kuwaasoo ay sii baareen xubnaha Guddiga Farsamada ee Xulitaanka. Guul ku dhammaynta hawlaha aan soo sheegnay, iyadoo ay jireen caqabado badan ayaa waddada u xaartay in la doorto Gudoomi-yaha Baarlamaanka cusub, markaa ka dibna waxaa la doortay Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

Haddii aan dib u jaleecsano, wuxuu qofku is weydiin karaa muxuu Geeddi-socodka Nabadda Soomaaliya kaga duwanya-hay dadaalladii hore ee la isku dayay in Soomaaliya looga saaro maamulka ku meelgaarka ah ee u muuqday inuusan dhammaa-nayn. Sidoo kale, doorashu maxay ugu fadhidaa Soomaaliya iyo guud ahaan gobolkaba?

Haddii aan billowno jawaabta, waxaa la oran karaa casharo muhiim ah ayaa laga bartay dadaalladii horay u dhici jiray. Tan koowaad waa baahida loo qabay in maamullada Soomaaliyeed ee ku meelgaarka ahaa ay iyagu ku qancaan tallaabo kasta oo la qaadayo oo ku saabsan geeddi-socodka. Waxaa kaloo iyadana muhiim ahayd isla shaqeynta ka dhaxeysay Saxiixayaasha Qorshe-Hawleedka. Inkastoo aan arrintan la isku hubin marar badana ay liidatay, dadaalka bulshada caalamka ayaa gacan ka geystay wada shaqeynta iyo isku haynta dhinacyada ay taladu ka go'do. Arrintan waxaa soo bisleeyay oo banaanka soo dhigay markii geedi-socodka lagu qorayay dastuurka uu burburi gaaray bartamihii sannadkii 2012.

Sida ay bulshada caalamka iyo waddamada gobolku iskula socdeen oo ay isula shaqaynayeen, codkooduna ugu midays-naa dhammeynta qorshe hawleedka ayaa iyaduna arrinta kaalin muhiim ah ka cayaartay.

Waxaa la sameeyay hanaan wadajir ah oo ka dhexeeya Urur-goboleedka IGAD, Qaramada Midoobay iyo Midowga Afrika si ay u yeeshaan wada shaqeyn dhow iskana kaaashadaan arrimaha saameeya geeddi-socodka nabadda Soomaaliyeed.

Soomaalida ayaa iyagana ka daalay ku meelgaarka oo aan dhammaanshaha laheyn iyo siyaasadda ku saleysan xaalka si-diisa ha iska ahaado. Qayladii ayaa aad u korodhay iyadoo ay soo baxeen dad ka tirsan bulshada rayidka ah oo aqoontoodu sar-reyso una ooman isbedel. Isbahaysi ka dhaxeeya xoogaggan aan soo sheegnay ayaa gacan ka siiyay maamulladii ku meelgaarka inay arrintana ku dheganaadaan horayna ugu geeddi-socodka.

Iyagoo arkaya laaluush, ayaa Soomaalidu waxay ku codeeyeen damiirkooda si ay isbedel u dheliyaan waxay codka sirta ah u adeegsadeen sida ugu wanaagsan si ay Soomaaliya ugu socoto waddada ay kaga baxayso fowdada ka dhalatay colaadda, dow-lad la'aanta iyo xagjirnimada una dhaqaaqdo sidii ay ku gaari lahayd nabad waarta iyo barwaaqo. ■

***Eeg sawirrada doorashada Guddoomoyaha Baarlamaanka:***
http://www.flickr.com/photos/unpos/sets/72157631300167952/

***Caleemasaarka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed ee cusub:***
http://www.flickr.com/photos/unpos/sets/72157631290303028/

# Dastuurka Loo Bogay

*Cumar Aadan Qaadi, Hawlwadeenka Waaxda Wadajirka Dastuurka*

Ka dib markii la qabtay shirar heer qaran ah, laguna horumarinayey dib u soo nooleynta Soomaaliya ayuu dalku wuxuu horey ugu qaaday tallaabo aad u weyn, taasoo dalka looga saarayo KMG nimada, laguna sameeyey is beddel la gaaray markii la ansixiyey dastuurka cusub oo si adag oo waxtar leh salka ugu dhigaya habkii ay dadka Soomaaliyeed si nabad ah isugula noolaan lahaayeen dhexdooda, waddamada deriskooda ah iyo dhammaan dunida inteeda kaleba.

Darstuurku wuxuu oggolaanayaa inay dhammaan bulshada ka qayb qaadato hawlaha jira, sidaas darteedna wuxuu waddada u xaarayaa jawi aad ugu habboon dibuheshiisiinta, isafgarad bulshada dhexdeeda ah iyo kalsooni ka dhisanta gobollada kala geddisan ee dalka iyo kooxaha kala geddisan ee dalka ka jiraba.

Dastuurka waxaa qoray guddi madax bannaan oo loo xilsaaray, kaasoo taageero ka helay guddi Baarlamaanku u qaabilsanaa arrimaha dastuurka. Sidoo kalena waxaa qoritaanka dastuurka gacan ka geystay guddi ka kooban khubaro iyo guddi farsamo oo dib u eegid ku sameeyey dastuurka iyo guddi kale oo farsamo oo fududeynaayey hawlaha guddiga. Iyadoo la adeegsanayo habkan iskaashiga mudan ayaa waxaa dastuurka ka dhex muuqday rajada iyo arrimaha khuseeya qaybaha bulshada Soomaaliyeed ee kala geddisan. Isagoo gacan ka geysanaya habkii lagu adkeyn lahaa midnimada Soomaaliya ayuu dastuurku ka fogaaday habka lagu kala qaybiyo dadka Soomaaliyeed qabiil ahaan, waxaana ka dhex muuqata sidii dadka la isugu keeni lahaa.

Dastuurka waxaa si aqlabiyad buuxda ah u ansixiyey Golaha Dastuur Sameynta 1dii Agoosto. Golaha Dastuur Sameyntu wuxuu ka koobnaa ergo dhan 825 xubnood, kuwaasoo laga wada keenay dhammaan qabiillada Soomaaliyeed. Sidaas darteed waxaa dastuurka haa ku ansixisay 621 xubnood waxaana diidday 13 xubnood, 11 xubnoodna waa ay ka aamuseen.

Arrimaha ugu waaweyn ee dastuurka ku qoran waxa weeye inuu si xoog leh ugu jeedinayo quluubta dadka Soomaaliyeed dhowrista xuquuqul insaanka iyo dhowrista xuquuqda dadka rayidka ah.

Markii u horreysey ee taariikhda Soomaaliya, aya guddi madax bannaan oo xoog leh oo qaabilsan arrimaha xuquuqul insaanka ayaa hawlgalaaya si uu u dhowro xuquuqul insaanka, guddigaasoo xaqiijinaya in Dawladda ama Hay'ad kaleba ayna xadgudub ku sameyn karin xuquuqda dadka, haddii ay xadgudub isku dayaanna ay wajihi doonaan sharciga.

Arrinta kale ee muhiimka ah ee ka dhex muuqata dastuurka waxay tahay qaadashada nidaamka dawliga ah ee ku dhisan habka federaalka.

Habka federaalka wuxuu ku baaqayaa in loo dhammaado xukuumadda iyo maamulkaba. Sida uu qabo dastuurka ugu yaraan laba gobol oo ka mid ah 18 kii Gobol ee hore ee dalka ayaa israaci kara si ay u sameeyaan qayb ka mid ah Maamulka Federaalka ama dawlad ka mid ah Dawladda Federaalka. Muddadii 6da sanno ee socotey la tashiga dadweynaha, ayaa dad badan oo Soomaaliyeed muujiyeen aragtida ah in nidaamka fedraalka uu yahay habka ugu fiican ee lagu salayn karo xukuumadda mustaqbalka iyo Hay'adaha Dawladdaba, Hay'adahaasoo ku dhisan habka isla xisaabtanka, dimoqoraadiyadda iyo hufnaantaba.

Si loo dhamaystiro loona ansixiyo Dastuurka Kumeel-gaarka ah, waxaa loo baahanyahay in ay la socoto Istratejiyadii lagu hirgelinlahaa. Sidoo kale, waxaa loo baahanhahay in la horumariyo dhinacyada Amniga, dhismaha Hayadaha Dowliga ah iyo kaabayaasha dhaqaalaha si ay Soomaaliya isu bedesho una hesho xasilooni, Maamulwanag, iyo Xuquuqul Insaanka oo aad loo horumariyay- taas oo ah arrin aad loogu xadgudbay.

Maa daama ay hadda jiraan maddaxwayne iyo Baarlaman cusub, baarlamanka Federaliga ah iyo Dowladda Federaalka ah ayaa bilaabaya dib u eegista Dastuurka Kumeelgaarka ah ka dib marka ay howshooda bilawdaan. Wixii wax kabel ah ee u saabsan Dastuurka waxaa samaynaya Guddi Maddax Banan oo qaabilsan Dibueegista Dastuurka iyo Gudigga Hirgelintinta Dastuurka.

Sidaas darted wuxuu Guddigu soo jeedinayaa in Dastuurka dib u eegis lagu sameeyo ayadoo lala kaashanayo dadwaynaha , maamuladda Federaaliga ah ee jira, iyo Baarlamaankuba. Wixii dib u eegis ah ee lagu samaynayo Dasturka waa in ay ansixiyaan Seddex- meelood laba meel oo kamid ah xubnaha Baamaarlamanka. Hase ahaata ee, arrintan waxkabedelka ah waxay dhici kartaa oo keliya marka la ansixiyo Dasturka Kumeel-gaarka ah ayna dadwaynaha Soomaaliyeed ku ansixiyaan Referandum, arrintaas oo dhici doonta affarta sanno ee soo socota. ■

## WAXYAABAHA DASTUURKU KA KOOBANYAHAY

- **Cutub Koobaaya Arrimaha Aasaasiga ee Xuquuqul Insaanka.**
- **Waxaa la caddeeyey in dadku leeyihiin xuquuq siman iyadoon loo eegeynin hayb qabiil ama diin.**
- **Islaamku waa diinta keliya ee uu dalku leeyahay, waloow ay sidaas tahay oo aan diin kale dalka lagu faafin karin ayaa hadana waxaa la oggolyahay xuriyadda diinta.**
- **Jinsiyadda Soomaalinimadu waa xaq aan la diidi karin – waxaana la oggolyahay haysashada labada dhalasho.**
- **Muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin in wax la baro ilaa heerka dugsiga sare.**
- **Waxaa la oggolyahay xaqa nolosha.**
- **Waxaa reebban addoonsiga, is adeegsiga iyo dadkoo si xoog ah loogu shaqeysto.**
- **Waxaa la damaanad qaaday xuriyadda iyo amniga qofka – waxaa mamnuucan in qofka si sharci darra ah la isaga xirto, loo jir dilo ama loola dhaqmo si banii'aadaminimada ka baxsan.**
- **Qofku wuxuu xaq u leeyahay cawil celin macquul ah oo ku saabsan hawl qabadkiisa.**
- **Waxaa aad looga digtoonaanayaa arrimaha haweenka, waxaana si xoog loo badbaadinayaa haweenka.**
- **Waxaa reebban nooc kastoo xad gudub ah oo ay ka mid yihiin xad gudubyada loo geysanaayo haweenka.**
- **Waxaa reebban gudniinka haweenka.**
- **Haweenku waxay lahaanayaan xuquuq gaar ah oo looga badbaadinaayo xad gudubyada ku saabsan galmada, midab takoorka iyo faquuqid lagu sameynaayo goobta shaqada. Sharci kasta ee shaqaalaha waa inuu u hoggaansanaadaa sinnaanta raga iyo dumarka ee goobta shaqada.**
- **Waxaa ballan qaadan oo la oggolyahay in dumarku ka qabgalaan arrimaha siyaasadda.**
- **Waxaa la meel marinayaa maamul wanaagga iyo hab siyaasadeed hufan iyadoo la adeegsanaayo 10 guddi oo madax bannaan.**
- **Waxaa la sameynaayaa guddiga xuquuqul insaanka, runta iyo dib u heshiisiinta, la dagaallanka musuq maasuqa, garsoorka, shaqaalaha dawladda iyo dabagalkaba.**
- **Wixii dood ah ee ku saabsan dhulka waa in si nabad ah lagu xalliyaa.**
- **Soomaaliya waxaa lahaaneysaa nidaam maamul ee ku dhisan habka federaalka.**
- **Soomaaliya waxay lahaaneysaa habka is maamul ee Baarlamaanka.**
- **Soomaaliya waxay lahaaneysaa guddi garsoor oo madax bannaan.**

# Qorshaha Amniga Soomaaliya

*Gihan Eltahir Eltom*
*Hawlwadeen ku takhasustay u ololeynta iyo warbaahinta*
*Xafiiska Horumarinta Arrimaha Amniga ee UNPOS*



Ciidamada xoogga Soomaaliyeed oo mar dhow la soo tababaray bishii August 14, 2012 iyagoo jooga goob tababar oo ay leeyihiin hawlgalka midowga afrika ee Soomaaliya, AMISOM oo ku taala galbeedka Muqdisho

Labaatankii sano ee la soo dhaafay laga soo billaabo markii ay dhacday Dawladdii Maxamed Siyaad Barre, Soomaaliya waxay ku jirtay qas iyo degenaansho la'aan, taasoo burburisay waddankii ugu dambeyntiina lagu waayey dawladnimadii Soomaaliya.

Haddaba maadaama ay maanta Soomaaliya ka gudbeyso xilligii kala guurka isuna beddeleyso hab is beddel xambaarsan, waxaa jira rajo, taasoo u baahan in loo helo amni wanaagsan iyo caddaalad loo wada dhanyahay. Bishii Agoosto 2012 waxaa la ansixiyey Qoorshihii Amniga iyo Xasillinta Soomaaliya (NSSP), qoorshahaasoo koobaaya sanadaha 2012 ilaa 2014. Qoorshaha waxaana lagu ansixiyey dikareeto Madaxweyne, waxaana lagu magacaabay tallaabo taariikhi ah.

Diyaar gareynta iyo qoritaanka qoorshaha NSSP wuxuu ahaa mid loo dhanyahay, ayna gar wadeen ka ahayeen dad Soomaaliyeed, kuwaasoo adeegsaday shirar taxane ahaa ee lagu qabtay Naivasha, Puntland, Gaalkacyo, Nairobi iyo Muqdisho , dad badan oo ay arrintu khuseyso ayaa ka qayb qaatay dejinta qoorshahan, kuwaasoo ka koobnaa mas'uuliin ka tirsan Dowladda Soomaaliya iyo maamullada gobollada sida Ahlu Sunnah Wal Jamaaca, oo ah ciidamo Dawladda bahwadaag la ah, wakiillo ka socda Bulshada Rayidka sida ururrada haweenka iyo bulshada caalamkaba.

**Qoorshaha NSSP**
**wuxuu xoogga saarayaa arrimaha soo socda :**

- **Xoojinta arrimaha amniga ee heerka sare iyo siyaasad cadaalad ku dhisan iyo istiraatiijiyad horumarin leh iyo hanaan wada xiriir.**
- **Dib u dhisidda hay'adaha amniga ee la awoodi karo, hay'adahaasoo noqon doona kuwa u adeega dadka, lehna xirfadda difaaca ciidan, amniga, cadaaladda, ciidanka asluubta iyo hay'adaha kaleba.**
- **Qoorshuhu wuxuu xaqiijinayaa sidii ay si waxtar leh isu kaabi lahaayeen, isulana xiriiri lahaayeen hay'adaha amniga ee dowliga iyo kuwa aan dowliga ahayn iyo hay'adaha qaabilsan arrimaha cadaaladda iyo kuwa kaleba.**
- **Qoorshaha NSSP wuxuu horumarinayaa sidii loo kordhin lahaa ka qaybqaadashada Baarlamaanka iyo ururrada bulshada rayidka ay ka qaybqaataan arrimaha amniga dalka iyo dadaallada ku aaddan horumarinta qaybta cadaaladda.**
- **Sidoo kale qoorshuhu wuxuu horumarinayaa oo joogteynayaa habkii kaalmo joogto ah oo caalami ah loogu heli lahaa qoorshaha xasillinta Soomaaliya.**

Ansaxinta iyo meelmarinta qoorsha NSSP wuxuu udub dhexaad u yahay habkii lagu abuuri lahaa Soomaaliya oo nabad ah, maadaama uu qoorshuhu si cad u qeexaayo doorka iyo mas'uuliyadda ay leeyihiin hay'adaha rayidka iyo militerigaba sida Wasaaradda Gaashaandhiga, Garsoorka iyo Arrimaha Gudaha iyo hay'adaha kale ee hoos yimaada sida Booliska, Militariga, Nabadsugidda, Asluubta iyo Socdaalkuba.

Qoorshuhu wuxuu kaloo ka hadlayaa tababar loo fidinayo Guddiga Baarlamaanka u qaabilsan Arrimaha Maaliyadda, Garsoorka, Bulshada Rayidka, Ururrada Haweenka iyo sidii loogu sameyn lahaa Soomaaliya ciidan dhab ah oo leh xirfaddiisa, lehna awoodda sugitaanka ciidan iyo maamulidda arrimaha cadaaladda afarta sano ee soo socota.

Ujeeddada ugu dambeysa ee Qoorshaha NSSP waxay tahay sidii lagu heli lahaa Soomaaliya oo nabad ah, awood leh oo ku dhisan nidaamka Federaalka, dadkeeda dhexdiisana ay ka jirto nabad waarta, sidoo kalena nabad la ah deriskeeda. Waddan ay nabadi ka jirto waa waddan ay ka shaqeyso cadaaladda, ilaaliyana sharciga iyo xuquuqul insaanka muwaadiniintiisa, una adeega ummaddiisa, difaacana dastuurkiisa, midnimada dhulka iyo sharafta ummaddaba.

Qoorshuhu wuxuu kaloo ku baaqayaa sameynta dhowr guddi oo kormeer ah ama xisaabi xil ma leh ah, guddiga amniga qaranka iyo guddiyada kale ee madaxabannaan ee ku habboon arrinta iyo hay'adaha kaleba sida guddiyada amniga ee heerka gobol iyo degmo.

Arrinta ugu muhiimsan oo mudnaanta koowaad leh waqtiga dhow waa in dowladda soo socota lagu taageero inay qorto sharciyada, qoorshaha iyo istiraatiijiyada ku habboon arrimaha amniga, cadaaladda iyo sharciga kala dambeynta, taasoo waafaqsan Dastuurka KMG ah, sidoo kalena dib u eegid ku sameysa qoorshe hawleedka iyo kala horreysiinta arrimaha mudnaanta kala leh ee sanadka 2013. ■

## Diyaarinta Jawiga Siyaasadeed ee Soomaaliya:

# Taariikh nololeedka Xaliima Ismaaciil Ibraahim-la gudoomiyihii Guddiga Farsamada Xulitaanka

*Salma Zulfiqar, UNPOS/Albany Associates Communications Consultant*



Halima Ibrahim. CREDIT: UNPOS Public Information Office

Markii ay jirtay 15 sano ayay Xaliima Ismaaciil Ibraahim u doodi jirtay xaquuqda haweenka markaasoo ay ku jirtay Dugsiga Sare ee Afgooye, magaalaas oo soddon kiilomitir u jirta magaalada Muqdisho.

Haddii ay jirtay dawlad shaqeynayso iyo haddii aysan jirinba, Xaliima Ismaaciil waxay ahayd tii mar walba u shaqeynaysay dadka masaakiinta ah, difaacaysana xaquuqul insaanka muddo labaatan sano ah. Maxaa yeelay Xaliimo waxay ahayd qof u taagan difaaca xaquuqul insaanka oo ayna ka go'nayd. Dhowaana Xaliimo waxaa loo magacaabay inay noqoto la gudoomiyaha Guddiga Farsamada Xulitaanka.

"Waxaan dadka barayay arrimaha beeraha, waxaana ka shaqeynayay beeraha anigoo samaynaya baaritaan markaas oon ogaaday in xuquuqda haweenka la iska illoobay indhahana laga qabsaday, waxaan arkay haween aad u shaqeynaya, qodaya beeraha, ka shaqeynaya guriga, korinaya carruurta laakiin aan lahayn wax xuquuq ah markay timaado lahaanshaha dhulka, sidaas darteed, arrintan waxaan kala hadlay dadka sharci-dejiyaasha waddanka ah " ayay tiri Xaliimo.

Xaliimo waxay tusaale u soo qaadatay naago garoobo ah oo aan wax xuquuq ah ku lahayn dhulkooda ka dib markii ay dhinteen nimanklooda, inta badana laga tago iyagoo aan shillin haysan.

Si loo kaalmeeyo haweenkan iyo kuwa kale oo la mid ah, ayay gabadhan u dooda haweenka waxay sameysay iskaashato ay leeyihiin Beeralayda Haweenka Soomaaliyeed sannadii 1980kii taasoo cadaadis ku saartay dawladdii markaas jirtay oo markii dambeetana ogolaatay in dhul siiso haweenka.

Markuu dagaalkii sokeeye billowday 1990kii, waxaa aad u sii xumaaday xaaladda xuquuqul insaanka ee Soomaaliya, sidaas darteed, ayaa xaliimo iyo sagaal kale oo haween ah go'aansadeen inay sameeyaan urur bulsho oo lagu magacaabo IIDA (Ururka Horumarinta Haweenka) si loo hormariyo loona badbaadiyo xaquuqda haweenka, iyo si ay arrinta u doodida xaqa haweenka u ahaato mid nool.

"Dhab ahaantii aad bay sharaf iigu ahayd in aan arko anigoo ka mid ah xubnaha guddiga farsamada ee xulitaanka sidoo kalena waxaa sharaf ii ahayd in aan arko in xubnaha guddigaas ay ka koobnaayeen dhammaan qabaailada Soomaaliyeed. Wixii farqi ah ee anaga naga dhaxeeyay meel ayaan iska dhignay, waxaanu noqonay dad dhexdhexaad ah markii aanu kala xulaynay xubnihii u sharaxnaa inay ka mid noqdaan baarlamaanka" ayay tiri Xaliima Ismaaciil.

Guddiga Farsamada Xulitaanka ayaa door weyn ka ciyaaray hagidda jawiga siyaasadeed ee Soomaliyeed. Guddigan wuxuu ka koobnaa 27 qof iyo labo xubnood oo kale oo aan iyagu cod lahayn kana socday Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya. Xubnaha 27ka ah qof walba qabiil ayuu matalayay, sidoo kale waxaa guddiga ka tirsanaa todobo xubnood oo ka socday bulshada caalamka. Hawsha ugu weyn ee guddiga loo igmaday waxay ahayd inay ansixiyaan ama ay diidaan musharixiinta magacyadooda loo soo gudbiyay baarlamaanka. Guddigu wuxuu diiday todobaatan qof oo buuxin waayay sharuudihii looga mid noqon lahaa baarlamaanka.

"Waxaanu la hadalnay oday dhaqameedyada waxaanu weydiisanay inay ahaadaan dhexdhexaad, waxaan u sheegnay in laga doonaayo inay badbaadiyaan Soomaaliya. Waxaan kaloo u sheegnay inay gacan ka geystaan sidii lagu samayn lahaa baarlamaankii ugu fiicnaa dalka ee waligeed soomaaliya yeelato. Waxaan kaloo u sheegnay odoyaasha inay waddada u xaaraan sidii Soomaaliya loogu abuuri lahaa waa cusub" ayay tiri Xaliima Ismaaciil oo intaas sii raacisay in doorka odoyaasha ka ciyaareen habka xulitaanka ay gacan weyn ka geysatay sidii lagu abuuri lahaa baarlamaanka dadkiisu ugu aqoon badan yihiin ee ka jira dalka soomaaliya.

Xaliimo waxay kaloo sheegatay inay si aad ah ugu dagaalantay sidii haweenka Soomaaliyeed u heli lahaayeen boqolkiiba soddon 30% kootada loogu talagalay inay ka helaan baarlamaanka hase ahaatee boqolkiiba toban iyo shan 15% ayay heleen haweenka Soomaaliyeed ilaa hadda.

"Soomaaliya waxay ahaan jirtay waddan kor u socday soona baxaayay. Qof walba waxuu heli jiray waxbarasho lacag la'aan ah, haweenkuna fursado ayay heli jireen, waxaan rajeynayaa in waqtigaas aanu dib ugu noqon doono".Haweenka Soomaaliyeed waxaa loo sifayn karaa labo siyaabood. Mar lagu ixtiraamayo guriga iyadoo hooyo ah madaxa gurigana ah, marka ay guriga banaanka ka joogaana waxay ahaayeen dad aan cod lahayn maadaama intooda badan ay ahaayeen dad aan tacliin iyo awood lahayn " ayay sheegtay Xaliimo

Iyadoo ka xishoonaysa inay xubin baarlamaan noqoto ayaa Xaliimo waxay leedahay waxaan sii wadayaa la shaqeynta dhow ee aan la shaqeynayo xubnaha baarlamaanka si aan ugu hadlo in isbedel dhinaca sharciga ah laga sameeyo dalka si markaasi dadka Soomaaliyeed u helaan badbaado fiican." Waxaanu tusnay dunida in dadka Soomaaliyeed ay lahaan karaan geedi-socodkooda ayna sameyn karaan isbedel ku wajahan dhinaca wanaagsan ee dalka". ■

***Watch video clip of Halima:***
**http://www.flickr.com/photos/unpos/sets/72157631535657391/**

### Garyaqaanadda:

# Danjirayaasha Cusub ee Arrimaha Xuquuqul Insaanka Soomaaliya

*Waaxda Xuquuqul Insaanka ee UNPOS*



***- Ma jiraan dad kaga fiican garyaqaanada inay difaacaan una doodaan arrimaha xuquuqul insaanka -*** ayuu yiri, Xasan, oo ah agaasimaha xafiis gargaar sharci ee ku yaalla Somaliland. Arrintana waxaa uu uga hadlayaa aragtidiisa ku aaddan sida ay garyaqaanada u difaaci karaan una horumarin karaan arrimaha xuquuqul insaanka si loo badbaadiyo dadka Soomaaliyeed.

Xasan wuxuu ka mid ahaa 24 garyaqaano oo laga wada keenay dhamman dalka Soomaaliya oo idil, oo markii ugu horeysay meel la isugu keenay muddo labaatan sanno ah kadib si ay u wada qaataan tababar ku saabsan xuquuqul insaanka marka la maareeynayo cadaaladda. Tababarka waxaa fududeeyay Xafiiska UNPOS u Qaabilsan Xuquuqul Insaanka, isagoo la kaashanaya xafiiska UNDP ee Hargeysa, waxaana la qabtay bishii May ee la soo dhaafay.

Maadaama Dastuurka Ku-meelgaarka ah lagu xaqiijiyay ilaalinta xuquuqul insaanka, waxaa lagama maarmaan ah in garyaqaanada ay u doodaan ilaalinta iyo dhowridda xuquuqul insaanka si Soomaaliya looga abuuro dhaqan ku saleeysan xurmeynta xuquuqul insaanaka.

Kadib markii ay burbureen hay'adihii dowliga ahaa, waa muddaddi ay jirtay colaadda, waxaa ficil ahaan loogu dhaqmayay habka garsoorka ee ku qotoma dhexdhexaadinta arrimaha lagu murinsanyahay. Caqabadaha ugu waaweyn ee haystay hay'adaha garsoorka waxay ahaayeen kalsooni darrada lagu qabay habka garsoorka ee sharciga ahaa. Sidaa darteed, taageerada Waaxda UNPOS ee Xuquuqul Insaanka waxay ka koobantahay taageerada loo fidinayo shakhsiyaadka muhimka ah ee ku hawlan fulinta garsoorka sida garsoorayaasha, xeer-ilaaliyeyaasha, iyo garyaqaanada si ay si waxtarleh ugu gutaan doorkooda ku aaddan horumarinta xuquuqul insaanka waa marka la maamulayo caddaaladda.

Laga billaabo bishaa Nofeembar 2012, waxaa dalka oo dhan ka billaabanaya tababaro kor loogu qaadayo wacyiga iyo garashada garsoorayaasha jooga Soomaaliya. Waxaana la rajaynayaa inay arrintan isbedel ka sameyso dalka oo ay ku dhiirigeliso madaxda dalka inay horumariyaan ayna ka hirgeliyaan shuruucda caalamiga ah ee xuquuqul insaanka Soomaaliya. "Arrimaha xuquuqul insaanka waa inay ahaadaan udub-dhexaadka geedi socodka nabadda," sidaas waxaa qaba Ku-xigeenka Ergaygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midobay u qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Peter de Clercq. Md. de Clercq waxa kale ee uu garwaaqsanyahay in ku xadgudubka xuquuqul insaanka ay ka midtahay arrimaha asaaska u ah colaadda ka jirta Soomaaliya.

Tababarada uu fidinayo xafiiska UNPOS u qaabilsan Xuquuqul insaanka waxaa loola jeedaa in lagu dhiirigeliyo garyaqaanadda hadda shaqeeya sidii ay u soo qeexi lahaayeen waxyaalaha ay wadaagaan sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, Shareecada Islaamka, iyo shuruucda kale ee ka jirta dalka Soomaaliya. Shuruucda caalamiga ah ee xuquuqul insaaka waa in marka hore la ogolaadaa inay waafaqsantahay dhaqanka sharci ee dalka ka jira si markaas dadka ku shaqada leh maamulka cadaaladda ay u horumariyaan una hogaaansamaan shuruucda.

Waaxda Xuquuqul Insaanka ee UNPOS ayaa taageero dheeraad ah u fidinaysa aqoonyahanada Soomaaliyeed si loo joogteeyo horumarka ilaa iyo hadda la gaaray. Ka dib markii ay ku kulmeen Jabuuti horaantii sannadkan, wakiillo ka kala socda afar jaamacadood ee Soomaaliyeed – oo kala ah: Jaamacadda Muqdishu, Jaamacadda Dowladda Puntland, Jaamacadda Bariga Afrika iyo Jaamacadda Hargeysa ayaa go'aansaday inay soo saaraan manhaj qabyo-qoraal ah oo ku saabsan xuquuqul insaanka loo adeegsado maamulka caddaaladda. Hadaba, bishii May ayaa wufuud ka socota jaamacadahan kor ku tilmaaman bilaabeen inay is waafajiyaan qabyo-qoraaladdii la soo gudbiyay si ay u noqdaan casharo la mideeyay oo lagu tababaro garsoorayaasha, xeer-ilaaliyeyaasha iyo garyaqaanada, taasoo lagu gorfeeyay seminaar dabagal ah ee ka dhacay Hargeysa, Somaliland oo ay soo qabanqaabisay Waaxda UNPOS ee Xuquuqul Insaanka.

Xasan ayaa ka warramaya sida uu wax uga bartay tababarka ay bixisay Waaxda UNPOS u qaabilsan xuquuqul insaanka wuxuuna yiri "waanu wada shaqayn karnaa annagoo ku hadlayna magaca Soomaaliya inkastoo siyaasadda goboladu ay kala gedisantahay."

Dhab-ahaanti, tababaradda xuquuqul insaanka iyo seminaarada ku saabsan manhajka ku la xiriira xuquuqul insaanka ayaa isu keenay wakiilo sharciqaqaano ah oo gobollada ay ka kala yimaadeen aad u kala gedisan. Hase ahaatee, tababarku wuxuu fursad u siiyay ka qaybgalayaasha shirka inay ka wada hadlaan wixii la qaban lahaa mustaqbalka si loo horumariyo nidaamka caddaaladda ka jira Soomaaliya iyadoo la dhowrayo shuruudaha caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo shuruucda dalka ka jirta. ■



UNPOSsomalia wall photo

# Wuxuu kayimid Twitterka-wuxuuna ku socda Goobaha Shaaha lagu cabo

*Laetitia Pactat,*
*Lataliyaha Arrimaha Digitalka-AU/UN Information Support Team*

*"@UNPOSomalia@un@UN-DPA Danjire Mahiga waa in loo hambalyeeyaa maadaama uu suurta geliyay arrintan, wuxuu u howgaly si hagra laaan ah si loo helo sibedel ku wajahan dhina wanaagsan*

*waxaa sidaa yiri Harbi Kullane@ xarbi in Mogadishu, waa tusaale kamid ah wax qabadka xisaabta Twitterka UNPOS*

Natiijadii ka dhalatay Howgalkii iyo Arrimaha ku wareegsan geedi socodka nabadda Soomaaliyeed ayaa aad u soo jiidatay warbaahinta addunka. Si daas darted, Xafiiska Qaramadda Midowbay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS), ayaa is arkay un asaga oo dhexda ugu jiro ama garwadeen ka ah wadahadalo, Dood, hadal- is diidan iyo xanba (ee la xariirtay geedi-socodka nabadda Soomaaliya).

Sidaas darted, Xafiiska Qaramadda Midowbay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS) ayaa gartay baahidda loo qabo in lala xiriiro dadka Soomaaliyeed , ha ahaadeen kuwa dalka gudihiisa ama dibadiisa joogaba, maadaama ay dadka Soomaaliyeed yihiin kuwo warka Dalkooda aad u faafiya, kana wada dooda.

Sidaas darted ayey UNPOS bishii Julay 2012 samaysa seddex goobood ee war lagu baahiyo (waa qaybta Digitalka ah) si fiican si loogula xiriiro dadka Soomaaliyeed ha ahaadeen kuwa jooga Dalka Gudihiisa ama Dibadiisa. Seddexda gooboodna waxay kala yihiin: Twitter (@UNPOSomalia), Tumblr (unposomalia.tumblr.com) iyo flickr (flickr.com/photos/unpos)

Qabta Twitterka:@unpoSomalia, waa qayb si gaar ah loogu diyaariyay in ay shaaciso Howlaha Xafiiska, iyo Arrimaha kale ee warbaahinta la xiriira. Sidaas darted, qaybta @UNPOSomaliya, waxay dadka Arrimaha Soomaaliya kala socda dalka gudihiisa iyo dhamaan dunida dacaladeedaba ka heli karaan arrimaha ugu dambeeyay ee Siyaasadda Dalka, sida War saxaafadeedka, Arrimaha kale ee ku soobaxa war- baahinta, goobaha shirarka lagu qabanayo, wakhtiyada ay dhacayaan shirarka, iyo xogta ama wararka ku saabsan dhibaatada dalka ka jirta,- dhamaan arrimaha aan soo sheegnay waxaa laga heli karaa @UNPOSomalia account ama sisaabta.

Markii u horaysay, waxaa inta badan lasocon jiray Howlaha Xafiiska (dhina twitterka) war baahinta Gudaha oo keliya, laakin markii dambe waxaa cadaatay in dad badan oo Soomaaliyeed oo kale ay iyaguna kala socdaan Arrima Xafiiska dhinaca Twitterka, waxaana ka mid ah dadka ku nool Hargaysa, Muqdisho, Minneapolis, Toronto, Oslo, iyo Melborn,-dhamaan dadka ku nool goobaha aan soo sheegnay ayaa si toos ah ula socda Howsha xafiiska ayaga oo addegsanaya Twitterka.

Adeegsiga Twitterka UNPOS wuxuu oogu fiicnaa dhowan makii ay socotay doorashadii Madaxwaynaha Soomaliyeed, mudadaasi Twitterku awoodiisa iyo baaxadda laga dhegaysanaayayba aad ayeey wayneed. Mudadani Qabyta Xisaata unpoSomalia (Twitterka eh) waxuu si dhow ula shaqaynayay Raadiyaha Barkulan si loo gudbiyo arrimaha doorasha ayadoo toos ah oo looga dhegaysankaro dhamaan dunida dacaladeeda ka la gedisan. Dadka dhegaysanayay tiradiisu waxay u korartay si aadan malayn Karin markii lagu dhawaaqayay natiijada doorashada. Xisaabta unpoSomalia waxay u korartaty min 120 to 1200 qof oo dhegaysanaysa saacado keliya bishii Sebtember.

Tiradda dadka dhegaysanayey Twitterka ee korartay Markii doorashada Madaxwaynaha socotay waxaa ka muhiimsanaa awoodda loo yeeshay in si toos ah loo gudyo xogta ku saabsaneed isbedelka ayadoo la adeegsanayo Qalabka la yiraahdo Twitterka. Twitterka UNPOS iyo Kooxda ka shaqaysa ayaa si hufan u soo tebiyay Geedi Socodka Siyaasadda kas oo ahaa mid loo dhanyahay ayna garwadeen ka ahaayeen dadka Soomaaliyeed.

UNPOS waxay aad u danaynaysay in fariimaha isbedelka xambaarsanaa ay soo gaarsiiso dadka ama Qaysaska Soomaaliyeed meel walba ha joogaane iyo in ay u fududayso dadka ka qayb-galka ay ka qaybgalayaa geedi socodka nabadda arrintaas oo muhiim u ah geedi socodka nabadda. ■

***La soco Twitterka: @UNPOSomalia***

# Haweenku Waxay Ku Xisaabtamayaan Nabadda

*Ismini Palla, Hawlwadeenka Isgaarsiinta Guud, Muqdisho*




30 Haweenka ka qaybgalay shirka Maalinta Furan ee Nabadda iyo ammaanka oo lagu qabtay Muqdisho iyagoo ka kala yimid wadanka oo dhan

Soomaaliya waxaa lagu tiriyaa inay ka midtahay meelaha ugu khatarsan adduunka ee ay haween ku noolaadaan sida ay sheegtay Ilwad Maxamuud Cali oo ka tirsan Xarunta Elma nee Nabadda iyo Xuquuqda Aadanaha. "Haweenka aad baa loo xaqiraa loona dayacaa, kama qaybqaataan hawlaha go'aan gaarista", ayay tiri iyadoo nabad ku baaqaysa.

Mw Ilwad Maxamuud Cali waxay ka mid ahayd haween gaaraya 30 oo ka wakiil ah degaanada iyo ururada bulshada ka kala socda koonfurta Soomaaliya, Puntland iyo Somaliland, oo laba maalmood ku kulmay magaalada Muqdisho si ay uga qaybgalaan shirka Maalinta Furan ee Qaramada Midoobay oo sannadlaha ah halkudhigeeduna ahaa: "Nabad Loo Wada Dhanyahay" oo ay fududeysay Waaxda Arrimaha Ragga iyo Haweenka ee UNPOS oo ay taageerayaan Hay'daha Qaramada Midoobay ee Dalka Soomaaliya, sida UN Women, UNDP, UNFPA, UNHCR iyo OCHA.

Sannadkan haweenka Soomaaliyeed oo metelaya qaybo ballaaran oo bulshada ka mid ah ayaa ka hadlay arrimaha laxiriira sidii lagu heli lahaa adeegyada asaasiga ah, sida nolol maalmeelka, waxbarashada iyo caafimaadka, horumarinta iyo ilaalinta xuquuqda haweenka, ka hortagga xoog la isu sheegto, haweenka siyaasadda ku jira iyo kaalinta ay haweenku ku leeyihiin sugidda nabadda.

"Kooxaha xagjirka ah ayaa mar walba ka soo horjeeday horumarka iyo awood-siinta haweenka, iyadoo ay jiraan caqabado xagga dhaqanka ah ee horyaalla nolosha, xuquuqda iyo waxbarashada haweenka," ayay raacisay Xaawa Cali Jaamac, oo muddo dheer u doodaysay xuquuqda haweenka, madaxna u ah Xiriirka Ururrada lagu magacaabo (WAWA) ee ka socda Puntland.

Hase ahaatee, Mw Xaawa Cali Jaamac waxay garowsanaysaa in sannadahan dhow la gaaray horumar ballaaran, gaar ahaan marka la eego amniga. "Haddam eel fagaara ah ayaan ka hadli karnaa, markii hore sidaan doono uma hadli karin."

Shirka Maalinta Furan waa fursad si qotodheer loogu fahmo dadka degaankana ayna ku hantaan Qaraarka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 1325 ee ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amniga.

Haweenka ka qaybgalay shirka Maalinta Furan waxay talooyinkooda u soo bandhigeen Qaramada Midoobay, bulshada caalamka, madaxda Soomaaliyeed, culimaa'udiinka iyo isla haweenka laftooda, si loo dejiyo hawlaha mudnaanta leh, loo dedejiyo hirgelinta Qaraarka 1325.

"Ka qaybgalkiinu wuxuu muujinayaa inaad ku hawlantihiin iyo inaad ka wakiil ka tihiin haweenka kale, taasna waa waxaan mas kasta ku baaqaynay: inay haweenku wakiil ka noqdaan haweenka kale," ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah ee Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay, (SRSG) ee Soomaaliya, Augustine P. Mahiga, isagoo la hadlayay shirka. "Aniga waxaa mar kasta u riyaaqaa aqoonta qotada dheer iyo wacyiga ay haweenka Soomaaliyeed u leeyihiin arrimaha haweenka iyo Qaraarka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay 1325," ayuu raaciyay Ergeyga Gaarka ah Danjire Mahiga.

Isagoo shirka la hadlaya, Isuduwaha Gargaarka Baniaadanimo ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya, Mark Bowden, wuxuu ku baaqay in haweenka kaalin sare laga siiyo habka nabadeynta. "Khibradda raga iyo tan haweenka ee ay u leeyihiin colaadda way kala duwanyihiin; sidaa darteed, haweenka waa in la siiyaa fursad ay kaga qaybqaataan xallinta khilaafaadka," ayuu yiri Md. Bowden. "Si loo dhiso Soomaaliya oo sidan ka wanaagsan, loona dejiyo istaraatijiyad horumarin wax ku ool ah, haweenka waa in laga qaybgeliyaa," ayuu raaciyay.

In isbedel laga dheliyo haweenka Soomaaliyeed waa inay ugu horeysaa arrimaha mudnaanta u leh Baarlamaanka Federaalka Cusub ka dib markii la doortay madaxweynaha cusub, sida ay sheegtay Xaawa Cali Jaamac. " Waxaan fileynaa amni, ka qaybgalka haweenka oo kordha, nolosha haweenka oo sii hagaagta iyo waxbarashada gabdhaha oo horumarta," ayay tiri.

Inkastoo haweenka loo ballanqaaday inay boqolkiiba 30 ka helayaan Baarlamaanka Federaalka cusub, xulashadii xildhibaanadu waxay qaybtoodii ka dhigtay boqolkiiba 15. "Waa inaan hadda diiradda saarnaa dowladda inteeda kale, wasiirada, wasiir ku xigeenada iyo agaasimeyaasha guud. Waa inaan kordhinaa qaybta ay haweenku ka helayaan halkaas oo aay uga magdhownaa qaybtii boqolkiiba 30ka ay haweenku ka heli waayeen Baarlamaanka," ayay tiri Amina Shariif Xasan, oo ka socotay Codka Haweenka Soomaaliyeed ee Nabadda, Dibuheshiisiinta iyo Xuquuqda Siyaasadeed, oo ah Urur Bulsho aan Dowli ahayn oo ka jira Soomaaliya/Canada.

Ergeyga Gaarka Danjire wuxuu ku tilmaamay 36ka haweenka ee ka mid noqday xildhibaanada Baarlamaanka inay tahay "arrin horumar ballaaran ah" wuxuuna yiri guushaas waa inaan lagu miisaamin tirada ee lagu miisaamaa isbedelka maskaxda bulshada.

Sannaadihii la soo dhaafay colaaddu waxay haweenka iyo qoysaskooda ka saartay guryahooda si ay u raadsadaan hoy nabad ah, cunto iyo biyo. Haweenka barakaca waxay inta badan la kulmaan colaad, iyagoon heli karin dhul, hanta, waxbarasho iyo adeeg caafimaad. Dad gaaraya 600,000 oo ka mid ah 1.5ta milyan oo barakayaasha ah waa dad gaaray da'da daranka laakiin nasiib darro Soomaaliya waxaa ka jirta tirada ugu sarreysa ee dhimashada carrurrta ee adduunka oo idil.

Seynab Cilmi, oo ka socota Xarunta Caafimaadka Gaalkacyo, waxay tiri daryeel la siiyo caafimaadka taranka waa weli dhibaato taagan: "Aniga waxaan jeclaan lahaa inaan arko sannadaha soo socda in haweenka iyo carruurtu helaan caafimaad lacag la'aan ah iyo isbitaallo leh qalabka asaasiga ah iyo shaqaale ku filan".

"Anigoo ah gabar da'yar oo la shaqeysa haweenka dhibaatadu ka soo gaarto colaadda ku saleysan jinsiga (dhedig-labood), waxaan aad u rajeynayaa in mustaqbalka ay gabdhuhu helaan waxbarasho ayna fursad u helaan inay hogaanka isu diyaariyaan," ayay tiri.

Shirka Maalinta Furan wuxuu ku soo gabagaboobay hawlo mudnaan la siiyo ee la hirgeliyo laguna qiimeeyo shirka Maalinta Furan ee la qaban doono sannadka 2013 si loo dardargeliyo hirgelinta Qaraarka Golaha Amaanka Qaramada Midoobay 1325 oo ay taageerayaan hay'adaha Qaramada Midoobay. ■

***Eeg sawirada Maalinta Haweenka:***
***http://www.flickr.com/photos/unpos/sets/72157631548259232/***

# Hay'adaha gargaarku isbedel bay ka sameeyeen Soomaaliya, inkastoo ay caqabado jiraan

*Roberta Russo, Hawlwadeenka Warfaafinta Guud ee Hay'adda OCHA*



CREDIT: OCHA Public Information Office

Hawlaha gargaarka ayaa sanadkii la soo dhaafay xoogaa horumar ah ka sameeyey xaaladda bani'aadaminimo ee ka jirta Soomaaliya.

Sida ku cad warbixintii ugu dambeysay ee ay soo saartay Bishii Agoosto Waaxda Amniga Cuntada iyo Falanqaynta Nafaqada (FSNAU) iyo Shabakadda Nidaamyada Digniinta Degdega ah ee Macluusha (FEWSNET), tirada dadka Soomaaliyeed ee ay dhibaatadu haysatay ayaa hoos u dhacday 16% ama tirada waxay hoos uga dhacday 2.51 milyan ilaa 2.12 milyan horraantii sannadkii 2012.

Dadaalka hay'adaha gargaarka ka sokow waxyaabaha xaaladda bani'aadaminimo horumariyey waxaa ka mid ah: Dalaggii wanaagsanaa ee soo go'ay bishii Janaayo, kororka ku yimid helitaanka caanaha iyo qiimihii xoolaha nool oo kor uga kacay dhulka reer miyiga ee Soomaaliya.

Laakiin xaaladda misana hoos u dhac ayaa ku yimid bartamihii sanadkii 2012, dalaggii la rabey inuu soo go'o ka dib markay da'aan roobabkii la filayey inta u dhaxeysa bishi Abriil iyo Juun ayaa iyagana sidii caadiga ahayd hoos uga dhacay. Sidaa darted, dalaggii la filayey inuu ka soo go'o Koonfurta Soomaaliya ayaa isagana gaaray meeshii ugu hooseysay markii saddexaad tan iyo sanadkii 1995.

Xaaladda bani'aadaminimo ee Soomaaliya weli meel khatar ah ayay ku sugantahay "horumarkii aan sameynay ilaa iyo sanadkii hore ayaa dib u dhac ku iman kara haddii kaalmada heerka sare aan la joogteynin", sidaasi waxaa yiri Isku-dubaridaha Arrimaha Bani'aadaminimada ee Soomaaliya, Mark Bowden.

Inkastoo amni xumo iyo qalalaaso isa soo taraya ay ka jiraan koonfurta Soomaaliya, haddana Hay'adaha Gargaarku waxay si joogta ah mucaawino u siiyaan malaayiin Soomaali ah. Bishii July 2012 keliya, dad tiradoodu ka badantahay 1.6 milyan ayaa helay gargaar cunto, sidoo kale dad tiradoodu ay gaareyso 1.6 milyan ayaa si KMG ah looga haqabtiray biyaha, dadkaasi intooda badanna waxay ku noolaayeen Gobollada Koonfureed.

Hay'adaha Gargaarka ayaa hawshooda bani'aadaminimo wata inkastoo jawiga ka jira Soomaaliya uu yahay ka ugu khatarsan adduunka ee saameeya Hay'adaha Gargaarka. "Khatartu waa mid si dhab ah u jirta", ayuu yiri Bowden oo ka hadlaya munaasabadda Maalinta Arrimaha Bani'aadaminimada Adduunka, taasoo ku beegnayd 19ka Agoosto. Sanadkii la soo dhaafay oo keliya, waxaa la dilay 20 ka mid ah shaqaalaha Hay'adaha Gargaarka, 8 kalena waxaa lagu afduubay Soomaaliya, afar ka mid ahna weli waa la haystayaal. "Gebi ahaanba lama oggolaan karo in la weeraro shaqaalaha hay'adaha gargaarka haddii ay yihiin kuwo caalami ah ee ka fog guryahooda iyo qoysaskooda ama haddii ay yihiin kuwo u dhashay waddanhaba ee u adeegaaya bulshada lagu soo dhex koriyey, dhammaantood ajendaha keliya ay leeyihiin waa inay kaalmeeyaan dadka aadka u jilicsan. Sidaa darteed , dhammaan qaybaha ay khuseyso caqabadaha dalka ka jira waa inay xurmeeyaan hawlaha gargaarka bani'aadaminimo, ayna u ogolaadaan gargaarku inuu gaaro dadka u baahan".

27 Agoosto shaqaale ka mid ah Hay'adda Cuntada Adduunka ayaa lagu dilay magaalada Marka ee Koonfurta Soomaaliya. Marxuumka la dilay ee 32 jirka ahaa lana oran jirey Yaasiin Maxamed Xasan wuxuu ka mid ahaa koox ilaalineysay kanaallada lagu waraabiyo beeraha si loo kaalmeeyo beeraleyda. Dilka Yaasiin ka dib Hay'adaha Qaramada Midoobay ee ka shaqeeya Soomaaliya waxay soo saareen hadal qoraal ay ku xoojinayaan (in weerarka lagu qaado shaqaalaha Hay'adaha Gargaarku uu wax u dhimayo awoodda ay u yeelan lahayd Qarammada Midoobay inay si mug leh ama baaxad leh wax uga qabato arrimaha bani'aadaminimada, taasoo wax u dhimeysa dadka Soomaaliyeed ee aadka u jilicsan). Hadal qoraalku wuxuu kaloo tilmaamay in dadka rayidka ah ay yihiin kuwa ugu badan ay waxyeellada ka soo gaarto dhibaatada dalka ka jirta. Sidaa darted, dhammaan qaybaha ay arrinyu khuseyso waa inay aad u yareeyaan waxyeellada dadka rayidka ah.

Dhibaatada amni la'aanta ka sokoow, Hay'adaha Samafalku waxaa dhibaato ka haysata arrimaha maaliyadda, kuwaasoo wax u dhimaya mashaariicdii lagu badbaadin lahaa nolosha dadka aadka u liita. Ururrada bulshada iyo hay'adaha Qarammada Midoobay ee jooga Soomaaliya waxay u baahanyihiin 576 milyan oo ah doolarka Maraykanka, si ay wax uga qabtaan baahida dhumucda weyn leh ee ka jirta dalka wejiga labaad ee sanadka 2012. Kaalmada gargaar ee la codsaday dhammaan sanadka 2012 ayaa waxay gaareysa 1.16 bilyan oo ah doolarka Maraykanka, "Hay'adaha Arrimaha Bani'aadaminimada waxay u baahanyihiin maaliyad si ay ugu gargaaraan dadka aadka u jilicsan ee Soomaaliya, sida cunto, biyo nadiif ah oo la cabo, arrimaha caafimaadka iyo fayadhowrka iyo xanaanada daawada, kaalmada maaliyadeed. Waxaa kaloo looga baahanyahay in wax looga qabto joogteynta nolosha dadka wax yar haysta ama aan waxba haysanin, kuwaasoo ay soo dilootay abaar iyo colaad si markaasi loo xoojiyo u adkeysiga masiibooyinka mustaqbalka soo socda" ayuu yiri Md. Bowden. ■




# Ciidamada AMISOM OO Goobo

*Patrick Gathara, Hawlwadeenka Saxaafadda iyo Isgaarsiinta,*
*Kooxda Taageerada Warfaafinta Midowga Afrika/Qaramada Midoobay*

Gaashaanle Sare Brigadier Paul Lokech wuxuu u muuqdaa nin xoog badan, wuxuu harsanayaa geed qurac ah oo aad u weyn oo laamihiisa ay ka soo laalaadaan sanaadiiq ama qafaso shinni oo mar hore laga tagay. Waxaa ku hareereysan boqolaal askar ah oo ku mashquulsan dhismaha dhufeysyada xaruntiisa uu ka dagaalgalo oo in ka yar shan kiiloomitir dibadda ka ah magaalaberaleyda Soomaaliyeed ee Afgooye ee ku taalla agagaarka Webi Shabeelle.


Inkastoo muuqaalkiisa oo dhallinyaro u eg aan u dhigmin da'diisa iyo waayoaragnimadiisa, sarkaalkan 55-jirka ah wuxuu taliye u yahay in ku dhow 8,000 oo ciidamo Ugandan ah oo ka tirsan Ciidamada Midowga Afrika ee Soomaaliya.

Bishii Juun, ciidamadiisa oo ay weheliyaan kuwo ka socda Burundi waxay qabsadeen marinka Afgooye, oo ah waddo 30 kiilomitir ah oo isku xirta magaalada Muqdisho iyo Afgooye oo koonfur-galbeed kaga began, taasoo ahayd dagaalkii ugu horeeyay ee weyn ee ay ciidamada AMISOM ku qaadaan meel baxda magaala-madaxda Soomaliya. Hawlgalkan oo lagu magacaabay "Hawlgalka Xoreynta Shabeelle" waxaa loogu talagalay in kooxda Al-Qaacidda ku xiran ee Al-Shabaab lagaga saaro magaalooyinka u dhow magaalada Muqdisho ee ay ka dhigan jireen xarumo ay ka soo weeraraan dadweynaha magaalada.

Sidoo kale waxay ahayd isbedel weyn ee u soo kordhay ciidamada AMISOM oo Soomaaliya la geeyay sannadkii 2007da iyagoo awood loo siiyay inay kaalmo ka geystaan sidii loo heli lahaa xaalad dib loogu soo celiyo nabad iyo xasillooni dhammaan koonfurta Soomaaliya. Hase ahaatee, in badan oo ka mid ah shantii sanno ee dadka joogeen, waxay xoogga saareen sidii ay magaalada Muqdisho uga xoreyn lahaayeen gacanta Al-Shabaab, oo diiday geeddi-socodka nabadda oo doonaya inay aragti shisheeye ah oo xagjir ah ee ay ka qabaan Islaamka ku soo rogaan dadweynaha qunyarsocodka ah. Bishii Agoosto ee la soo dhaafay, ciidamada AMISOM waxay ugu dambeyntii ku guuleysteen inay gacan ku siiyaan Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed inay kooxda xagjirka ah ka saaraan xarumihii ay ka joogeen magaalada, arrintaasoo keentay muddadii ugu dheerayd ee nabad ah ee ay magaaladu hesho tan iyo markii uu dhacay taliskii Siyaad Barre sannadkii 1991.

Muddo gaaban oo guul ah ka dib, ciidamada Midowga Afrika waxay hadda u soo jeesteen inay Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed ku taageeraan dalka intiisa kale. Iyagoo ay dhiirigelisay guushii ay ku gaareen magaalada Muqdisho iyo tiradooda oo ahayd 12,000 oo la kordhiyay lana gaarsiiyay 17,731 markii la soo saaray Qaraarka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay, ciidamada AMISOM waxay ku faafayaan Soomaaliya, iyagoo Al-Shabaab ka saaraya magaalooyin ay dadku deganyihiin, jarayana isgaarsiintooda iyo waddooyinkii ay wax u soo maraan.

Afgooye waxaa lagu qabsaday iyadoon hal rasaas ah la ridin markii ay dagaalyahanada Al-Shabaab ay ka carareen in la hareereeyo. Xagga sare ee marinka, ciidamada Burundi waxay xoogaa iska



# Cusub Qabsaday

CREDIT: Stuart Price, AU/UN IST

caabin ah kula kulmeen Ceelasha Biyaha, oo 15 kiilomitir dibadda ka ah magaalada Muqdisho, laakiin taasi si fudud bay u burburtay markii ay dagaalyahanada Al-Shabaab iyo taliyeyaashoodu u carareen koonfurta xagga dekadda Marka, oo 90 kiilomitir u jirta magaalada Muqdisho. Haddana markiiba waxaa lagu qasbay inay sii cararaan markii ay ciidamada AMISOM ee aan joogsanaynin sii fideen ayna markiiba gaareen magaalada Marka, oo 3 sanno ku jirtay gacanta kooxda xagjirka ah.

Xagga waqooyiga, ciidamada AMISOM waxay waqooyiga uga sii siqeen magaalada Muqdisho, si dhakhsa ahna waxay u qabsadeen Al Fitr, oo ah xarun yar oo ay degdeg u qabsadeen markii ay Al-Shabaab isaga baxeen, waxayna halkaas ka heleen dirays mileteri iyo dukumiidiyo ka hor intayna qabsan magaalada Balcad. Islamarkaa, koonfurta, ciidamada Kenya ee dalka soo galay bishii Oktoobar iyagoo eryanaya Al-Shabaab oo markaa ka dibna ku soo biiray hawlgalka AMISOM, ayaa qabsaday magaalada istaraatiijiga ah ee Afmadow, oo ah waddada loo maro magaalada dekadda ah ee Kismaayo oo ahayd magaaladii ugu weynayd ee laga qabsada kooxda kooxda xagjirka ah ee Al-Shabaab.

AMISOM waxay mar horeba ciidamo u direen magaalooyinkan waxaana lagama maarmaan ah in la sugo waddada ay u soo maraan saadka iyo saanadda, si looga hortago in Al-Shabaab ay dagaalyahanadooda u keenaan gobolladan, loona suurtageliyo in halkaas la keeno ciidamo dheeraad ah ee AMISOM ah iyadoo loola danleeyahay in ugu dambeyntii ay ciidamada Ethiopia ay ka baxaan.

Ballaarinta AMISOM waxay xaqiijisay in geeddi-socodkii lagu dhammeynayay ku-meelgaarka, oo ay ka mid ahayd dastuurka ku meelgaarka ah oo lagu ansaxiyay Golaha Ansaxinta Dastuurka, soo xulidda iyo dhaarinta Baarlamaanka iyo doorashada Madaxweynaha, uu ku dhacay iyadoo aan lala kulmin dhibaato weyn ee xagga amniga ah. Sidoo kale, taasi waxay Dowladda Federaalka Soomaaliya siisay fursad ay awooddeeda ku fidiso goobihii ay hore u haysteen kooxaha xagjirka ah.

"Afgooye waa dambiisha cuntada ama beerta inta badan dalka Soomaaliya, sababaha keenay macluushii iyo abaartii sannadkii 2011kiina waxaa ka mid ahaa Al-Shabaab oo beeralleyda ku qasbay inay bixiyaan qayb ka mid ah wax soo saarkooda, taasoo ay ku dhinteen dad gaaraya 100,000," ayuu yiri Taliye Ku-Xigeenka Ciidamada AMISOM ee xilkiisu dhammaanayo, Sarreeye Gaas Audace Nduwumunsi. "Hawlgallada AMISOM waxay keeneen in gacanta lagu dhigo Afgooye iyo Marinka Afgooye, taasoo dadka halkaas ku nool siisay fursad ay dib ugu dhisaan noloshooda iyo nololmaalmeedkooda".

Bilo yar ka dib markii Afgooye la qabtay, Al-Shabaab waxaa laga saaray Marka iyo magaalooyin badan oo ku yaalla koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, oo ay ka midyihiin dekadda Ceel Macaan, magaalooyinka Kismaayo, Bibi, Harbole iyo magaalooyin kale oo istaraatiji ah. ■

***Scenes from Kismayo on Flickr: http://bit.ly/PWY65b***





Newly elected Parlimentarians in prayer following the inauguration ceremony in Mogadishu, Somalia CREDIT: Stuart Price AU/UN IST



Newly elected President Hassan Sheikh Mohamud during his first days in office CREDIT: UNPOS Public Information Office



Traditional Elders convene to select the National Constituent Assembly. CREDIT: UNPOS Public Information Office



Dr Augustine P. Mahiga meets with the Technical Selection Committee in Mogadishu. CREDIT: UNPOS Public Information Office




Members of the Technical Selection Committee review nominations by the Tradtional Elders for the new Federal Parliament. CREDIT: UNPOS Public Information Office




Newly elected Speaker of Parliament, Professor Mohamed Osman Jawari making his nomination for the new President in a secret ballot. CREDIT: UNPOS Public Information Office



Journalists wait for the results during the elections for the Presidency of the Federal Republic of Somalia. CREDIT: UNPOS Public Information Office



The new Somali Federal Parliament elects the Speaker, First Deputy and Second Deputy Speaker.
Around 230 participated in the voting, which was held at the Police Training Academy in Mogadishu



Members of the Somali National Army and the government-allied Ras Kimboni militia display the Somali national flag from the former control tower of Kismayo Airport while they celebrate it's capture after Kenyan AMISOM troops moved into and through Kismayo, the hitherto last major urban stronghold of the Al-Qaeda-affiliated extremist group Al Shabaab, on their way to the airport without a shot being fired following a two-month operation to liberate towns and villages across southern Somalia and Kismayo itself

CREDIT: Stuart Price, AU/UN IST